qor Allaha naftaydu Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, xaq waxaan ahani kama soo baxaane

Cabdullaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Waxaan qori jiray wax kastoo aan ka maqlo Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee anoo raba inaan xifdiyo, waxaa ii diiday arinkaa quraysh, waxayna i dheheen: ma waxaad Rasuulka ka qoraysaa wax kasta oo aad ka maqasho, Rasuulkuna nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waa bashar oo caro iyo caro la'aanba wuu hadlayaa?, waan joojiyey qoraalkii, waxaanan u sheegay Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, wuxuu afka ku fiiqay fartiisa, wuxuuna yiri: "qor Allaha naftaydu Gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee, xaq waxaan ahani kama soo baxaane."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Abuu Daa'uud]

Cabdullaahi Binu Camar wuxuu yiri: Allaha ka raali ahaadee waxaan ka qori jiray Rasuulka nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wax kastoon ka maqlo, si aan qoraalka ugu xifdiyo, rag quraysh ka mida ayaa ii diiday, waxay i dheheen: Rasuulku waa bashar oo wuu hadlayaa isago caraysan ama faraxsan wuuna gafi karaa ee ka jooji qoraalka. Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee ayaan u sheegay waxay igu dheheen ragaasi, wuxuuna ku ishaaray fartiisa Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee afkiisa, wuxuuna yiri: qor, Allaha naftaydu gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee waxan xaq ahayni kama soo boxo xaalad walbee, caro iyo caro la'aanba. Ilaahay sareeye wuxuu ka yiri Nabigiisa scw: "Nabigu hawadiisa kama hadlo * ee wuxuu ku hadlaa waxyi loo waxyooday" [suurada Anajm 3-4].

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/65077